WARBIXIN

SAFERWORLD
PREVENTING VIOLENT CONFLICT. BUILDING SAFER LIVES

Dhisidda Jubbaland

Aragtiyada bulshada ee Federaalleynta, Maamulka iyo Dib u heshiisiinta

Abriil 2016

Dhisidda Jubbaland

Aragtiyada bulshada ee Federaaleynta, Maamulka iyo Dib u heshiisiinta

ABRIIL 2016

Mahadcelin

Warbixintan waa qayb kooban oo laga tarjumay warbixinta luuqadda Ingiriiska ku qoran. Mahadi ha ka gaadho Maxamed Xuseen Eenow sida taxadarka leh ee uu u tarjumay iyo qaybtii uu ku lahaa diyaarinta warbixinta asalka ah ee ay wadajirka u diyaariyeen kooxaha SOSCENSA iyo SAFERWORLD oo laga soo saaray Daraasaddii laga sameeyey dhismaha Jubbaland iyo aragtiyada dadweynaha. Waxaa sidoo kale mahad gaar ah u direynaa Midowga Yurub iyo Oxfam Novib oo suurtageliyay soo saaridda warbixinta sahankan.

© Saferworld, Abriil 2016. Dhammaan xuquuqda buuggan way dhowran tahay. Lama oggola in qayb ka mid ah daabacaaddan dib loo soo saaro, lagu kaydiyo qalab dib looga soo ceshan karo ama lagu gudbin karo nooc kasta; electroonik, mekanik, sawir ama wax lagu qoro ama siyaabo kaleba iyada oo aan oggolaansho buuxda la helin. Saferworld waxay soo dhoweyneysaa isla markaana dhiirrigelineysaa ka faa'iideysiga iyo faafinta wax ka mid ah daabacaaddan.

Hordhac

Hannaankii dhismaha dowladda federaalka iyo Maamullada xubnaha ka ah federaalka ee sannadkii 2012 wuxuu ahaa mid aad u adag. Geeddi-socodyadii siyaasadeed ee hore ayaa lagu dhaleeceeyay in ay ahaayeen kuwo laga soo abaabulay dibadda ama ay xuddun u ahaayeen danaha siyaasiyiin ruug-caddaa ah. Maaddaama uu jiray khilaafaad siyaasadeed oo u dhexeeyay siyaasiyiinta bilowgii dhismaha dowlad goboleedka Jubbaland, cilmi baaristan waxaa looga gol lahaa in la eego haddii geeddi-socodkan siyaasadeed ee cusub uu keeni karo maamul wanaag iyo dib u heshiisiinta dadweynaha Jubbaland u baahan yihiin.

Tabaha:

- 961 qof oo isugu jiray haween, dhallinyaro iyo dadka laga tirada badan yahay ee magaalooyinka iyo tuulooyinka Jubbaland ayaa ka qaybgalay qaybtii tirada (Quantitative) ee sahankan.
- Xog Ururiyayaal Soomaaliyeed
- Xog laga soo ururiyay magaalooyinka Dolow, Garbaharrey, Belet Hawa, Kismayu, Afmadow, Badhadhe, xerooyinka barakacayaasha gudaha ee dadka reer Jubbada dhexe ee ku yaala Muqdisho iyo Kismayu.
- Wada hadal kooxeed iyo wareysiyo lala yeeshay Soomaalida maxalliga ah, siyaasiyiin iyo qaar ka mid ah bulshada caalamka.

Nuxurka Su'aasha cilmi baarista:

Ilaa heerkee ayuu nidaamka federaalisimku wax ka tari karaa baahida dadku ay u qabaan maamul wanaagsan iyo dib u heshiisiin?

Maamulka Jubbaland

Taageerada Bulshada ee nidaamka Federaaleynta

Cilmi baaristu waxay tilmaantay in dadweynaha Jubbaland si weyn u taageereen nidaamka federalisimka. Dadka la wareystay 90% waxay sheegeen in ay doonayaan nidaamkan. Dadka taageeray waxay u arkeen in nidaamku uu ugu horreyn wax ka tari doono hagaajinta nidaamka awood qaybsiga, laguna yareyn lahaa khilaafaadka. Waxay kaloo u arkeen in nidaamka federaalisimka uu yahay mid u fududeynaya dadweynaha in ay ka qayb galaan kulammada looga wada hadlayo danahooda laguna taageeri lahaa dib u heshiisiinta. Dadka qaarkood waxay sheegeen in federalisimku uu yahay waddo looga bixi karo qalalaasaha laguna hagaajin karo xiriirka bulshada.

Sawirka 1: Ma dooneysaa in aad aragto Hannaanka geeddi-socodka federaaleynta oo hirgala?



Dadka qaarkood ma taageerin federaalka, walaaca weyn ee ay qabeenna wuxuu ahaa in uu kordhin karo khilaafaadka isla markaana uu waddanka kala jejebin karo haddii dowlad xoog leh aan la dhisin Intaa waxaa dheer, in fahamka nidaamka federaalka uu aad u yar yahay dadweynaha dhexdooda. Faham la'aantaasi darteedna waxa dadweynaha dhexdooda ka jira jahawareer aad u mug weyn, sidaasi darteedna, waxa la oran karaa dadka si weyn uma fahamsana nidaamka ay taageerayaan. Dadka qaarkood waxay aaminsan yihiin in nidaamka federaalka uu yahay fikrad ama aragti shisheeye, qaar kalena waxay u arkaan caqabaddu in ay tahay Dastuur la'aanta dalka ka jirta maaddaama uusan jirin nidaam loo raaco waxa dadweynuhu ay doonayaan in ay sameystaan.

Sawirka 2: Ma dooneysaa in aad aragto Hannaanka geeddi-socodka federaaleynta oo hirgala? Haddii aadan dooneyn, sabab?



Dhismaha maamulka Jubbaland iyo ka qaybgalka dadweynaha

Marka la eego ka qaybgalka dadweynaha ee geeddi-socodkii dhismaha maamulka Jubbaland, daraasaddu waxay soo bandhigtay in ka qaybgalayaasha si weyn loogu wargeliyay arrinta ku saabsan dhismaha maamulka Jubbaland. Si kastoy ahaataba, run ahaantii dad fara badan awood uma lahayn in ay fahmaan qaabka maamulka Jubbaland loo magacaabay, waayo, inta badan waxay sheegaan in maamulka la doortay. Tani waxay sii xoojisay baahida loo qabo in bulshada caalamka iyo xukuumadda federaalkaba si sax ah u tixraac ugu sameeyaan sida hannaanka magacaabidda loo sameeyey.

Kooxaha ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka oo u dabbaaldegaya daah-furka Maamulka Ku meel gaarka ah ee Jubbaland (IJA) ee Soomaaliya. Maamulka ku meel gaarka ah waxa uu magaalada Kismaayo ka maamulaa dhulka xorta ah ee gobollada Gedo, Jubbada Hoose iyo Jubbada Dhexe ee koonfurta soomaaliya.
© DAVID MUTUA/UN PHOTO

Ka wada qaybgalka dadweynaha ee geeddi-socodka

Qaybta tirada (Quantitative) ee sahankan waxay soo bandhigtay in shakhsiyaad badan aan si toos ah loogala tashan hannaanka dhismaha maamulka Jubbaland. Si kastaba ha ahaatee, dad fara badan ayaa sheegay xilligii wareysiga la sameynayey in wakiilladooda lala tashaday. Dad badan waxay ka hadleen sida uu dhaqan ahaan munaasib u ahaa habka loo maray isla markaana ugu habboonaa xaaladda markaa la joogay, maaddaama aan la haynin dhaqaale iyo xoog shaqaale ku filan afti laga qaado dadweynaha oo ku saabsan dhismaha Maamulka Ku meel gaarka ah ee Jubbaland.

Kulankii Kismaayo ee Oktoobar 2014 waxaa loo arkay in uu ahaa mid qabaa'ilka ay u dhammaayeen, isla markaana ay xitaa ka qayb galeen dadka laga tirada badan yahay. Dhallinyaradu way la yaabbanaayeen sida ay dad fara badan awood ugu yeelan karaan in ay codkooda ugu muujiyaan si nidaamsan arrimo aad u adkaa ama dhib badnaa.

Waxa jiray codad diiddanaa. Dhallinyaradu waxay aaminsanaayeen in dadka ku dhow Kismaayo oo keliya ay awood u lahaayeen in ay ka qayb galaan kulankaasi. Waxaa kaloo jiray kooxo qabiileed, sida Digil iyo Mirifle iyo qaybo ka mid ah Mariixan oo naqdiyay sida uu shirku u ahaa mid loo wada dhan yahay dareemayna in aysan jirin daahfurnaan lagu kala garan karo kan ka qaybgalaya shirka iyo kan sharci ahaan u matalaya qabaa'ilka.

Dadka laga tirada badan yahay

Intii lagu gudajiray wareysiga, dadka laga tirada badan yahay ee Jubbaland waxay dhammaantood ka wada hadleen ka mid ahaanshahooda hannaanka siyaasadda. Heerka ka mid noqoshada dadka laga tirada badan yahay ee hannaanka dhismaha maamulkana waxa uu lahaa sifo wanaagsan oo yididiilo leh. Dadkani waxay dareemeen in ay mustaqbalka u tartami karaan jagooyin sare oo siyaasadeed, taasoo ahayd mid aanay hore u awoodin.

Dhallinyarada

Dhallinyaradu waxay ka hadleen sida ay weli dibad-joog uga yihiin geedd-socodka siyaasadda isla markaana aanay awood ugu lahayn in ay helaan qof u matala siyaasadda. Walaaca ay dhallinyaradu qabeen waxa uu ahaa u af-duubnaanta hannaanka siyaasadda ee odayaasha iyo siyaasiyiinta looguna tala galay in aan iyaga laga tixgelin hannaanka gudihiisa.

Dhallinyaradu way isku dayeen in ay ka qaybgalaan isla markaana u ololeeyeen magacaabidda musharaxooda hase yeeshee ugu dambeyntii go'aanka kama dambeysta ah waxaa gaaray Odayaasha dhaqanka.

Waa muhiim in qaybaha kala duwan ee bulshada ay wakiillo ku yeeshaan maamulka, haddii taasi aysan dhicin, waa suurtagal in wada tashiyadu ay u dhacaan sida ay dadku rabaan, laakiinse ugu dambeysta lama gaarayo isbeddel siyaasad ahaan.

Haweenka

Haweenku weli ma heystaan wakiil u matala dhanka siyaasadda. Saddex haween ah oo keliya ayaa loo magacaabay Baarlamaanka Jubbaland. Ka qaybgalkooda siyaasadda waxay weli ku xiran tahay odayaasha. Tani waxay si cad u muujineysaa in aragtiyo daciif ah ay saameyn weyn ku leeyihiin gaaridda go'aannada siyaasadeed isla markaana aragtida haweenka inta badan la iska indhatiray.

Maamulka Jubbaland waxa uu awood u yeelan karaa ka jawaabidda baahida dhammaan dadka qaybta ka ah Jubbaland marka uu xaqiijiyo ka wada qaybgalka siyaasadda iyo matalaadda dhammaan qaybaha bulshada – haweenka, dhallinyarada iyo dadka laga tirada badan yahay. Odayaasha waaweyn oo keliya ayaa si weyn looga tixgeliyaa go'aan qaadashada marka ay timaado dhallinyarada iyo haweenka. Xaqiijinta ka wada qaybgalka waxay kaloo wax ka tari kartaa dhismaha kalsoonida lagu qabo maamulka cusub ee Jubbaland isla markaana suurtagelin kartaa in laga soo guuro nidaamka matalaadda siyaasadda iyo go'aan qaadashada ee ku dhisan qabiilka.

Aragtiyada sida uu Maamulka Jubbaland ku sameysmay

Dad badan waxay qabaan in qaabka uu Maamulka Jubbaland ku sameysmay uu ahaa mid aan la oggolaan Karin. Dadka la wareystay way ku kala qaybsameen arrintaasi gaar ahaan marka loo eego gobol gobol ahaan. Dadka laga wareystay Jubbada Hoose waxay qabaan in hannaankaasi uu ahaa mid la aqbali karo marka la barbardhigo dadka laga wareystay gobolka Gedo gaar ahaan degmooyinka Garbaharrey iyo Belet Xawo.

Sawir 3: Ilaa heerkee ayaad is leedahay hannaankii dhismaha JL waa la oggolaan karaa (Gobollada oo dhan)



Sawir 4: Ilaa heerkee ayaad is leedahay hannaankii dhismaha JL waa la oggolaan karaa (Gobolka Gedo)



Dadka gobolka Gedo waxay inta badan aaminsan yihiin in maamulka jubbaland xukunka ay ku yimaadeen taageero shisheeye ama awood ciidan. Farqiga xagga fikirka ee u dhexeeya dadweynaha Garbaharrey iyo Beled Hawo wuxuu muujinayaa kala qaybsanaanta siyaasadeed ee qaybaha Marexaan iyo qaar ka mid ah bulshada digil iyo mirifle iyo Kismaayo.

Intaa waxaa dheer, dad badan oo aaminsan in qaabka deegaanka ee lagu dhisay maamulka Jubbaland uu yahay mid la oggolaan karo, waxay sheegeen in uusan jirin waddo kale oo loo mari karay, sidaas darteedna ay tahay in la iska oggolaadaan. Qaar kale oo ka mid ah dadka waxay qabaan in qaabka dhismaha Jubbaland (JL) uu ahaa mid aan fiicneyn balse uu ka fiican yahay nidaamkii qabiilka ee 4.5.

Xog wareysi lala yeeshay bulshada caalamka waxay ku sheegeen, marka loo eego xaaladda lagu sugan yahay, in qaabkani uu macquul yahay isla markaana mudan tahay in lagu ammaano ka go'naantii siyaasadeed iyo dadaalkii lagu bixiyay in la yeesho hannaan wada tashi.

Qaab Dhismeedyada siyaasadda iyo go'aan qaadashada ee Jubbaland

Jubbaland waxay leedahay masuuliyiin siyaasadeed iyo kuwo maxalli ah, min odayaasha iyo guddiyada xaafadaha, ilaa degmooyinka, gobollada iyo kan maamulka Jubbaland. Waxaa jira xildhibaanno, shaqaale dowladeed, guddoomiyayaal iyo guddiyo degmooyin iyo dad kale oo fara badan oo ku lug leh go'aan ka gaarista arrimaha deegaannadooda. Tiradaa faraha badan ee go'aan qaatayaasha ah iyo maqnaanshaha qaab ay u wada shaqeeyaan ama u gutaan masuuliyadahooda waxay sababtay in ay adkaato fahamka sida uu maamulku u shaqeynayo. Masuuliyiinta laftoodu waxaa ku adkaatay in ay fahmaan sida loo wada shaqeynayo iyo masuuliyadda qof kasta saaran. Tani waxay adkeynaysaa cidda ay muwaadiniinta la xisaabtamayaan maaddaama qofna aanu garaneyn masuuliyadaha madaxda kala duwan.

Kalsoonida Maamulka Jubbaland ay ku matalaan dadweynaha

Saddexda gobol way ku kala duwan yihiin arrinta ku saabsan kalsoonida ay ku qabaan maamulka Jubbaland. Waxaa jira kalsooni heer sare ah oo ay dadka Jubbada Hoose ku qabaan in maamulka Jubbaland uu matalayo danahooda taasi oo ka yara hooseysa tan dadweynaha Jubbada Dhexe aadna uga sii hooseysa tan dadweynaha Gobolka Gedo.

Sawir 5: Ilaa heerkee ayaad is leedahay maamulka Jubbaland wuu ka shaqeeyaa danahaaga? (Gobol ahaan)



Sawir 6: Ilaa heerkee ayaad is leedahay maamulka Jubbaland wuu ka shaqeeyaa danahaaga? (Degmooyinka Gedo)



Sawir 7: ilaa heer ayaad is leedahay maamulka Jubbaland wuu ka shaqeeyaa danahaaga? (Degmooyinka Jubbada Hoose)



Gaar ahaan, waxaa jiray wakiillo ka tirsan Mariixaanka ku nool degmada Garbaharrey iyo qabaa'ilka Digil/Mirifle ee dega Jubbaland oo qabay in maamulka jubbaland aysan si buuxda u matalin danaha dadweynaha. Waxaa marka loo baahan yahay in maamulka Jubbaland uu waqti dheeri ah geliyo siduu u kasban lahaa kalsoonida dadyowgaasi ee ku saabsan matalaadda dhabta ah ee danaha dadweynaha Jubbaland. Ka qaybgalayaasha sahankan ee aaminsanaa in Maamulka Jubbaland uusan matalin danahooda waxay sheegeen in maamulku uu matalo danaha qabaa'il ama jilibyo gaar ah ama danaha gaarka ah ee hogggaamiyaha.

Go'aan qaadashada heerka maxalliga ah

Heer Deegaan, dadweynuhu waxay aaminsan yihiin in go'aan qaatayaasha ugu soo dhow uguna muhiimsan xaggooda in ay yihiin kuwa deegaanka – kuwaasi oo ah inta badan odayaasha dhaqanka, guddiyada xaafadaha iyo maamullada degmooyinka. Dowladda federaalka ah ee Muqdisho waxay u arkaan in ay tahay mid aan saameyn weyn ku lahayn go'aannada maxalliga ah.

Heer Gobol, tiro badan oo ka mid ah dadkii la wareystay way ku kala qaybsameen cidda leh go'aan qaadashada heer gobol, si kastoy ahaataba, maamulayaasha degmooyinka ayaa la aaminsan yahay in ay ugu muhiimsan yihiin marka la eego go'aan qaatayaasha heer gobol.

Xarunta Dhexe – Miyiga

Reer Miyiga waxay u badan tahay in aysan si fiican ugu qanacsaneyn Maamulka Jubbaland marka la barbardhigo dadka magaalooyinka deggan. Tani waxay muujineysaa in maamulka jubbaland uusan gaarsiisneyn goobaha ka fog magaalooyinka. Maamulka Jubbaland waa in uu xoogga saaraa siduu maamulkooda u gaari lahaa goobaha dibadda ka ah magaalooyinka waaweyn si ay u xaqiijiyaan in ay maamulaan qayb kasta oo ka mid ah dadweynaha.

Sawir 8: Ilaa heerkee ayaad is leedahay maamulka Jubbaland wuu ka shaqeeyaa danahaaga? (Magaalaooyinka iyo Miyiga)



Arrimaha saameynaya sharcinimada Maamulka Jubbaland

Inkastoo hannaankii magacaabidda xubnaha Golaha Shacbiga Jubbaland ee sannadku markuu ahaa 2015kii aan loo haynin caddeymo lagu qanci karo oo ku saabsan in musuqmaasuq uu harreeyay, haddana marka la eego khatarta hannaanku uu ka soo gudbay iyo garashada xagga caqliyadda jiritaanka musuqmaasuq harreeyay hannaanka ayaa ahayd mid heer sare ah. Sidaa darteed, Maamulka Jubbaland waxaa looga baahan yahay in uu ka shaqeeyo siduu uga hortegi lahaa in musuqmaasuq uu soo dhex galo maamulkooda isla markaana uu ka shaqeeyo dhisidda/soo celinta kalsoonida dadweynaha ee la xiriirta sida loo magacaabo xubnaha siyaasadda loona gaaro go'aannada.

Lacagta iyo abaalmarinnada siyaasadda

Inkastoo aanu jirin caddeymo la xiriirta musuqmaasuq hareeyay hannaankaasi xilligii magacaabista xubnaha baarlamaanka, waxaa la caddeeyey in lacagtu ay saameyn weyn ku lahayd go'aannada odayaasha dhaqanka. Odayaashu way fahamsanaayeen mabaadi'da aasaaska u ah xulashada musharaxiinta marka loo fiiriyo dhinaca mudnaanta. Si kastaba ha ahaatee, waxa la sheegay marka aad kala xulanayso musharax buuxiyay shuruudaha sida xirfadaha hoggaaminta, leh xirfad kala doorasho, u taagan bulshada lehna aragti fiican iyo musharax haystay hanti, in had iyo jeer ay dooran lahaayeen kan lacagta lahaa.

Maamulka Jubbaland waxay ku andaceedeen in musuqmaasuq uusan dhicin isla markaana nidaamkii loo dejiyay ee ahaa in bulshada ay u soo sharraxdaan saddexda musharax kursi walba oo ka mid ah kuraasta baarlamaanka uu ahaa tallaabo looga hortagayey musuqmaasuq maaddaama uusan jirin damaanad-qaadka cidda ku soo baxaysa kursiga. Si kastoy ahaataba, waxaa jiray calaamado muujinayey, marka laga soo tago gacmo lacag is dhaafsaday, in taageerada siyaasadeed ee Madoobe ay ahayd aasaaska go'aan ka gaarista xulashada xildhibaannada. Mid ka mid ah dadkii la wareystay ayaa ka hadlay sida ay jufadiisu u soo bandhigeen saddexda musharrax. Wuxuu sheegay in mid ka mid ah musharaxiinta bulshadu ugu muuqday nin aqoon fiican leh balse la ogaa in Axmed Madoobe uusan oggoleyn, midka kalena uu ka yara hooseeyay heerka aqoonta kan hore balse uu xiriir dhow la leeyahay Madoobe, isaga ayaana ku guuleystay kursiga baarlamaanka.

Xukuumadda Madoobe waxay u muuqataa mid dhiseysa Shabakad xulafo ah (xulashada xubno taageerayaal u ah madaxtooyada). Si kastoy ahaataba, khatarta dhiirrigelinta taageerada siyaasadeed ee maamulka Jubbaland way wiiqeysaa maamulka Madoobe, waxayna ku keeneysaa marka ugu dambeysa maamulka sida keliya uu ku jiri karo in ay noqoto in uu u sii wado lacagtaasi dadka isaga daacadda u ah. Waxay kaloo abuureysaa xaalad xafiiska siyaasadda uu ku noqdo mid ka shaqeeya dano shakhsiyadeed halkii looga shaqeyn lahaa danaha dadweynaha.

Badashada tirada iyo qiima dhaca odayaasha qabaa'ilka

Odayaashu waxay si weyn uga hadleen caqabadaha ka heystay in ay awooddooda ku doortaan siyaasiyiinta ay sida dhabta ah u doonayeen. Marar aad u fara badan waxay dareemeen in lagu qancinayo in ay xushaan xubno aysan aaminsaneyn in ay dani ugu jirto dadkooda.

Odayaasha qaarkood waxay aaminsan yihiin in khatarta ka soo fool leh ugaasyada la sameystay (Copy chiefs) ay ku qasbaan mowqifka ay qataan. Ugaasyada inta badan loo sameystay in ay sameeyaan xulashada siyaasiyiinta. Waxaa jiray dareen ah in uusan jirin hab lagu xaqiijiyo sharcinimada odey dhaqameedka ama ka difaacaya odey dhaqameedyada asalka ah qudhooda awood loo sheegto ama in uu kala doorto in oday kale lagu beddelo iyo in uu lacag ka qaato siyaasiga, taasoo ku qasabta in uu doorto in uu qaato lacagta. Xaaladdan ayaa sii xoojineysa baahida loo qabo in la helo doorasho dadweyne.

Awood la'aanta in ay ka hadlaan arrin ka horimaneysa xubnaha qabiilka iyo wakiillada

Waxaa reebban, dhaqan ahaan, in qofna uu si aan qarsooneyn uga hadlo arrimo ka horimanaya hoggaamiyayaasha qabiilka. Dhaqankani wuxuu si cad uga horimanayaa la xisaabtanka go'aan gaarayaasha iyo wakiillada qabiilka, waxayna u fududeyneysaa in ay u dhaqmaan hadba sida ay doonaan eedeyn la'aan, halka eedaha kale ee uga yimaada qabaa'illada kale inta badan la beeniyo ama loo arkaba been la soo dhoodhoobay, haddaba naqdinta ugu muhiimsan qabiilka waa tan uga iman karta gudaha qabiilka, balse haddii taasi aysan dhici karin, fursad cod bixin qarsoodi ahna aysan jirin, suurtagal ma noqoneyso in hoggaamiyayaasha qabiilka lala xisaabtamo.

Isku halleynta Siyaasiyiinta

Waxaa jirta isku halleyn la'aan baahsan oo ku saabsan siyaasiyiinta sida ay u daneynayaan matalaadda danaha qabaa'illadooda. Waxaa jira dareen ah in siyaasiyiintu ujeeddooyinkooda darteed ay u af-duubtaan magaca qabiilka. Sidaasi darteed, waxaa aad loogu baahan yahay in siyaasiyiinta la baro doorkooda iyo mas'uuliyaddooda. Dhisidda kalsoonida ka dhexeysa xubnaha baarlamaanka iyo dadkooda waa muhiim. Doorasho shacbi oo keliya ayaa noqon karta wadiiqada keliya ee lagu xaqiijin karo in xubnaha sida dhabta ah u matala dadkooda ay helaan kuraasta baarlamaanka.

Koobnaanta habka isla xisaabtanka

Waxyaabaha ugu waaweyn ee dhaawacay kalsoonida lagu qabay siyaasiyiinta iyo go'aan qaatayaasha waxay ahayd awoodda shacabka ee iska beddelidda ama iska qabashada go'aan gaarayaasha aan u shaqeyneynin danaha dadkooda. Intii lagu jiray daraasaddan, dadkii la wareystay waxay dareensanaayeen in masuuliyiintu aysan daruuri u ahayn in ay ka jawaabaan baahida dadkooda.

Intaasi waxaa dheer, in dadka badankood aaminsan yihiin in aan waxba laga qaban Karin masuuliyiinta si aad u liidata u gudanaya howshooda, kuwa tallaabada ka qaadi karayna inta badan uma arkaan in ay tahay tallaabadaasi hawl sahlan. Masuuliyiinta

Jubbaland way garowsan yihiin baahida iyo muhimadda ay leedahay isla xisaabtanka, si kastoy ahaataba qaarkood waxay ku doodeen in muhimadda kowaad ay tahay nabadgelyada iyo xasilloonida isla xisaabtankuna dib ka iman lahaa.

Caqabadda kale ee laga dhawaajiyay waxay ahayd qaab dhismeedka maamulka Jubbaland oo aan la fahmi Karin. Ma jirin waajibaad shaqo oo cad, sidoo kale, ma cadda howsha ay u xil saaran tahay waax walba oo ka tirsan xukuumadda. Waxaa aad u adag in la garto sida xukuumadda iyo shaqaalaha dowladda loola xisaabtamo. Qaab kastoo ay ku yimaadaan masuuliyiinta dowladda iyo shaqaalaheedaba; hadday tahay mid ku yimid xulashada qabaa'ilka, kuwo uu magacaabay Madaxweynaha iyo kuwo ku yimid nidaam deegaanba in la garto sida loola xisaabtamo way adkaan doontaa.

Rajooyinka laga qabo mustaqbalka hanaanka magacaabidda Mas'uuliyiinta Jubbaland

- 90% dadku waxay rabaan mustaqbalka doorasho dadweyne.
- Si kastoy ahaato, doorashooyinku ma noqon doonaan kuwo si deg deg ah u xaliya dhibaatooyinka jira.
- Waxaa weli suurtagal ah in nidaamka doorashada la musuqmaasuqo.
- Siyaasiyiintu way taageeraan doorashada, balse waxa suurtagal ah in 10ka sano ee soo socotaa ay iska fiicnaato rabitaan la'aanta ama ka cago jiididda hirgelinta dimuqraadiyadda ay dadku doonayaan.
- Haddii doorashooyinka la doonayo in ay dhacaan, bulshada caalamka waa in ay si buuxda u maalgeliso si ay u dhacdo.
- Doorashooyinka waxay xoojin karaan kalsoonida ay ku qabaan dadka masuuliyiinta Jubbaland.

Xiriirka Dowladda Federaalka iyo Maamulka Jubbaland

- Xiriirka dowladda federaalka iyo Jubbaland ma wanaagsanayn, gaar ahaan xilligii dhismaha maamulka Jubbaland xilligaas oo dowladda dhexe ay is hortaagtay dhismaha maamullada.
- Xiriirku wuu soo hagaagayey wixii waagaa ka dambeeyey, laakiin sida ay ku talisay daraasaddu waxaa weli loo baahan yahay in wax badan laga qabto sida loo qaybsan karo awoodaha ka dhexeeya labada qaybood si loo xaqiijiyo danaha dadweynaha.
- Dowladda Federaalka iyo Jubbaland waxaa loo baahan yahay in ay sii wadaan dhismaha kalsoonida dhexdooda ah.
- Ma jiro qaab dhismeedka siyaasadda oo cad oo lagu hago Federaaleynta.

Xiriirka jilayaasha caalamka iyo Jubbaland

Dadka badankii waxay u fahmeen faragelinta bulshada caalamka mid lagu caawiyayo bulshada soomaaliyeed, inkastoo afkaar kala duwan laga qabo taa lafteeda. Dadka qaarkii waxay qabaan in faragelintoodu faa'iido inoo tahay, kuwo kalena way ka shakisan yihiin sababaha ay soomaaliya u joogaan kumana qanacsana. Dadka qaarkood waxay aaminsan yihiin in ay doonayaan shidaalka iyo gaaska ceegaaga xeebaha soomaaliyeed in ay gurtaan qaar kalena waxayba aaminsan yihiin, sida Itoobiya oo kale, ay doonayso in ay hesho waddo ay u marto dekedda Kismaayo.

Ciidanka AMISON oo dusha uga taagan mid ka mid ah gawaarida gaashaaman (Tank) meel dibadda ka ah dekedda magaalada Kismaayo. Tan iyo markii dhidibbada loo taagay Maamulka Jubbaland sannadku markuu ahaa 2013, waxay dad badani u arkaan in adeegga amniga uu soo hagaagayo.
© STUART PRICE/UN PHOTO

Adeegga Bulshada iyo isla xisaabtanka Maaliyadeed

Jiritaanka xiriir wanaagsan oo ka dhexeeya dadka iyo xukuumadda waxaa lagu qiimeyn karaa marka la eego sida ay xukuumadda u gudato waajibaadka ka saaran u adeegidda bulshada. Dadka la wareystay waxay soo bandhigeen baahiyahooda iyo waxyaabaha muhimadda gaarka ah u leh noloshooda, inkastoo ay si weyn ugu kala duwan yihiin marka loo eego gobol-gobol ahaan. Waxaa muhimadda kowaad u ah bulshooyinka waxbarashada iyo caafimaadka. Inkastoo arrimaha garsoorka iyo musuqmaasuqa oo lala dagaallamo ay si gaar ah u xuseen dadweynaha Jubbada Dhexe. Dad fara badan ayaa qaba in federaaleyntu ay ahayd farsasmada/habka adeegga loogu dhaweynayo bulshooyinka.

Xaaladda hadda aynu joogno, odey dhaqameeedyada, guddiyada xaafadaha ama Ururrada bulshada rayidka ah ayaa bixiya adeegga ay u baahan yihiin dadweynaha, inkastoo , dad fara badan ay jeclaan lahaayeen in howshaasi qabato dowlad rasmi ah – gaar ahaan Maamulka Jubbaland ama maamullada degmooyinka. Intaa waxaa dheer, dadweynaha la wareystay in inta badan ay rumeysan yihiin in laga soo billaabo sannadku markuu ahaa 2013 in horumar fara badan laga sameeyey adeegyada caafimaadka, waxbarasahda iyo nabadgelyada. Inkastoo dad fara badan ay arrintaa ka soo horjeedaan, arrinta xusidda mudani waxay tahay in tiro aad u yar oo ka mid ahaa dadkii la wareystay ay rumeysan yihiin in arrinta looga sii daray tan iyo markii ay yimaadeen maamulka Jubbaland. Intaasi waxaa dheer, dadka qaarkood ay muujiyeen in maamulka Jubbaland uu leeyahay masuuliyadda isbeddelkaa laga sameeyey adeegga iyo nabadgelyada.

Gargaarka caalamiga ah waxa uu door fiican ka ciyaaray horumarka si kastoy ahaataba waxaa muhiim ah in gargaarka loo qaybiyo si siman dhammaan Jubbaland laguna koobnaan Kismaayo oo keliya. Dadaal fara badan waxaa lagu bixiyay hirgelinta nidaamka Maareynta Maaliyadda Dadka ka dhexeysa ee Kismaayo. Inkastoo tani loo baahan yahay in la sii ballaariyo oo la gaarsiiyo Jubbaland oo dhan isla markaana si isku mid ah looga hirgeliyo Soomaaliya oo dhan si uu u noqdo mid wax ku ool ah.

Federaaleynta iyo maamulka Jubbaland

Howsha federaaleynta soomaaliya waxay abuurtay jawi ay ku soo baxaan maamullo xubno ka ah federaalka, taasi waxaa barbar socotay in la helay fursad dib loogu habeeyay qaab-dhismeed maamul ugu yaraan heerka Maamullada xubnaha ka ah federaalka, sidaas darteedna u fududeysay in maamul wanaag, go'aan qaadasho dimuqraadi ah iyo ka wada qaybgal siyaasadeed la curiyo. Dadku way rabaan federaaleynta iyo nidaam go'aan qaadasho oo wax ka tari kara baahidooda.

Dib u heshiisiin

Waxaa muhiim ah in dadweynuhu kala gartaan dib u heshiisiin bulshadeed iyo mid siyaasadeed marka ay ka hadlayaan guud ahaan dib u heshiisiinta iyo waxa ay tahay si looga fogaado jahawareer xagga fahamka ah loona seegin maareynta waxyaabaha la doonayo in lagu gaaro dib u heshiisiinta.

Dib u heshiisiin bulshadeed waa dhismaha/xoojinta kalsoonida dadka iyo wax ka qabashada caddaalad-darradii horey u dhacday. Dib u heshiisiinta siyaasadeedse waa in siyaasiyiinta rug-caddaaga ah ay uga qaybgalaan hannaankaasi si micno leh si loo gaaro higsi ama aragti siyaasadeed oo ay wadaagaan.

Dib u heshiisiinta siyaasadda

Bulshada reer Jubbaland baahi weyn ayay u qabaan dib u heshiisiinta siyaasadda. Dib u heshiisiintaa siyaasadda waxay ka dhexeysaa qabaa'illo taariikh fog oo ujeeddooyin iska soo horjeeday lahaa iyo qabaa'illo waaweyn oo isu abaabulanayey maliishiyaad dhan ka ah midba midka kale iyo kuwo yar yar oo dareensan in la quursaday. Qabaa'illo soo hijrooday, gaar ahaan Marixan ka yimid gobollada dhexe ayaa cadaadis ku saaray dadkii ay u yimaadeen helitaanka dhul, biyo iyo kheyraad kaleba.

Waqtigan xaadirka ah, waxaa jira laba khilaafaad siyaasadeed oo muhiim ah oo u baahan in laga gudbo. Midda hore waxay tahay Digil iyo Mirile iyo heerka matalaadda ay ku leeyihiin maamulka Jubbaland. Midda kalena waxay tahay kooxda Marixaan ee Barre Hiiraale.

Barre Hiraale waxa uu gobolka ku leeyahay taariikh fog oo hammi siyaasadeed la salka ku heysa, goobjoogayaasha qaarkoodna waxay qabaan in uu sii wadi doono halgankaasi iyo u adeegsiga xoog milliteri xasillooni la'aanta Jubbaland ilaa uu ku guuleysto hoggaaminta. Si kastoy ahaataba, isticmaalka awood si loogu gaaro ujeeddo siyaasadeed waxay keeni kartaa hoos u dhaca sharcinimada xukunkiisa.

Dhismaha maamulka Jubbaland waxa uu fure u ahaa dhismaha ka wada qaybgalka siyaaasadda. Bilowgiiba, kulammadii Karen waxay noqdeen isku day lagu dooonayey dib u heshiisiin siyaasadeed iyo ka wada qaybgalka howlaha siyaasadda ee hoggaamiyayaashii hore ee ciidammada. Tan waa la ballaariyay si loogu soo daro qabaa'illada gobolka. Hannaankaasi waxaa loo arkay in uu ahaa mid loo wada dhan yahay intii ay awooddu saamaxeysay iyadoo ay jireen caqabado dhanka dhaqaalaha iyo amniga ah. Dadka laga tirada badan yahay waxay qayb ka ahaayeen hannaanka dhismaha maamulka, inkastoo haweenka iyo dhallinyarada ay dibad joog ka ahaayeen. Dadka laga tirada badan yahay dadaalladii lagu bixiyay ku soo biiriddooda siyaasadda waxay ahaayeen bilowga xallinta cabashooyinkii taariikhiga ahaa ee hore u qabeen, waxaa weli jira waxyaabo dhiman sida ka mid noqoshada siyaasadda ee haweenka iyo dhallinyarada taasoo Iyana u baahan in la xaliyo.

Tanaasulaad siyaasadeed iyo xoojinta dib u heshiisiinta siyaasadeed

Tanaasulaad Siyaasadeed – waa dadaalka jagooyin siyaasadeed lagu siinayo rug-caddaaga siyaasadeed si looga baabi'iyo caradaay qabaan dadka ku lugta leh siyaasadda oo doonaya in ay ka mid noqdaan dowladda. La wareystayaal fara badan ayaa aaminsan in isu-tanaasulidda siyaasadda ay ahayd waxyaabihii tixgelinta gaarka ah la siiyay markii la soo xulayey Xildhhibaannada baarlamaanka. Mas'uuliyiinta Jubbaland waxay caddeeyeen in howshaasi la fuliyay waxayna ahayd tallaabo lagu abuurayey kalsooni iyo ka wada qaybgalka siyaasadda ee dhammaan daneeyayaasha. Tusaale fiican waxa u ah sida loogu guuleystay in lagu soo daro xukuumadda laguna heshiisiiyo laba ka mid ah shanti iskood isugu magacaabay Madaxweynenimada bilowgii dhismaha Maamulka Jubbaland. Xubnahani waxaa jagooyin laga siiyay maamulka Jubbaland haatanna way taageersan yihiin. Inkastoo tanaasulaaddu keentay caqabado iyo khatarro.

Haweenka magaalada Kismaayo oo biyo dhaansanaya.
© CULTURAL VIDEO PRODUCTION/SAFERWORLD

Isu-tanaasulidda iyo tayada: Dad fara badan ayaa ka hadlay sida ay caadi u tahay in la arko dad aan u qalmin oo loo magacaabay jagooyin siyaasadeed sababo la xiriira tanaasulidda siyaasadeed. Waxaa jira isu-beddelesho baahida loo qabo tayada iyo baahida loo qabo abuuridda xasillooni siyaasadeed. Haddii Jagooyin fara badan loo qoondeeyo isu-tanaasulid darteed halkii laga eegi lahaa aqoonta taasi waxay keeni shaqooyinka wasiirrada qaarkood oo noqda kuwo aad u liita iyo in dowladdu ay u qabato dadweynaha adeeg aad u liita taasoo dhalin karta, dhinaca kale, taageerada dadweynaha ay u hayaan dowladda oo aad u yaraata.

Xaq u yeelashada jago: u qoondeynta qabiil jago siyaasadeed ama ku qancinta qaar ka mid ah siyaasiyiinta, waxay keeni kartaa in la aamino in jagadaasi ay qabiilkaasi xaq u leeyihiin mustaqbalka iyadoon la eegeyn aqoonta iyo xirfadda ama taageerada dadka.

Dib u heshiisiinta siyaasadda waa mid ka qoto dheer gorgortan/ku soo daridda iyo isa-siinta jagooyin siyaasadeed – taa beddelkeeda waa in ay jiraan kalsooni-dhisid ku saleysan is ixtiraam iyo aqoon. Dib u heshiisiintaa siyaasadda oo si deg deg ah xoogga loo saaro waxay markii dambe wiiqi kartaa xasilloonida.

U af-duubidda dib u heshiisiinta siyaasadeed gaaridda dano siyaasadeed

Dib heshiisiinta siyaasadeed waa muhiim balse waa in ruug-caddaaga siyaasadda uusan geeddi-socodkaasi ugu afduuban dano shakhsiyadeed. Waxaa aad muhiim u ah in loo howlgalo caddaaladda iyo meel marinta ra'yiga laysku raacsan yahay, balse waa in aan la hayste loo noqon kuwa doonaya in ay ku gaaraan danahooda gaarka ah sida

jago ama ku helaan kheyraad kale. Tani waxay keeneysaa oo keliya carqaladeynta geeddi-socodka isla markaana yareyneysaa faa'iidooyinka dadweynaha.

Shakhsiyaadka aan dooneyn in ay qayb ka noqdaan maamulka Jubbaland sababo la xiriira danahooda gaarka ah, waa in ay dibadda ka joogaan isla markaana ay noqdaan mucaarad siyaasadeed si ay ula xisaabtamaan xukuumadda.

Khalkhalgelinta qabiilka ujeeddooyin siyaasadeed darteed

Arrinta kore waxay la xiriirtaa in rug-caddaaga siyaasadda oo khalkhal geliya magaca qabiilka si uu u gaaro hankiisa. Siyaasiyiintan waxay ku doodaan in ay yihiin hoggaamiyayaal qabiil oo sharci ah ama waxay hoggaamiyayaal kale ku eedeeyaan in aysan ahayn wakiillo qabiil oo sharci ah ayagoo rajeynaya in ay gaari karaan xukunka.

Inta uu maqan yahay nidaamka dowladeed ee aan qabiilka ku saleysneyn – qabiilku wuxuu sii ahaan doonaa wadiiqada keliya ee loo mari karo siyaasadda arrinta u af-duubnaanta ama khalkhalgelinta qabiilkana way sii jiri doontaa.

U dhalashada iyo ku dhaqanka oo caqabad ku ah dib u heshiisiinta siyaasadda

Caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan dowladda federaalka ah iyo maamullada xubnaha ka ah federaalka oo dhan waa; yaa ah qofka leh xuquuqda matalaadda ama xulashada siyaasadeed ee deegaanka. Iyadoo dad badan ka soo guureen soomaaliya oo dhan isla markaana kooxo kale ay uga qaxeen dibadda sababo la xiriira khilaafaadka iyo abaaraha, arrinta ku saabsan yaa deegaan ah iyo halkee iyo sidoo kale xuquuqaha ay ka filanayaan deegaankaasi – ha ahaato maamulka federaalka ee soomaaliya ama maamullada xubnaha ka ah federaalka sida Jubbaland waxay u baahan doonaan in la caddeeyoka hor doorashooyinka 2020 iyo sidoo kale hannaanka magacaabidda golayaasha shacbiga ee sannadka 2019. Waa in golayaasha sharci-dejinta dowladda federaalka iyo kuwa xubnaha ka ah federaalka (FMS) ay sii billaabaan arrinkaasi iyo nidaamka diiwaangelinta cod-bixiyayaasha.

Al Shabaab – inkastoo dad fara badan ay u arkaan in aysan munaasib ahayn, Al shabaab waa jile siyaasadeed. Kol haddii dagaalka ciidammada xal looga gaari waayay in lagu jebiyo al shabaab qaabka wada xaajoodka waa in lagu dabbaalo xallinta khilaafkaasi.

Federaalnimada iyo dib u heshiisiinta siyaasadeed

Geeddi-socodka federaaleynta waxa uu muhiim u yahay dib u heshiisiinta siyaasadda. Dhismaha dowlad goboleedka waxa uu ku qasbay dadka qaybta ka ah siyaasadda in ay wada hadlaan. Arrinta ku saabsan ka wada qaybgalka siyaasadda ayaa laga wada xaajooday, meelaha hannaanka dib u heshiisiinta ay ka bilowdeenna waa in la ammaano.

Dib u heshiisiinta bulshada

Qof kastaa waxa uu rabaa dib u heshiisiin bulsho – balse ma ahan wax qof kasta uu sheegi karo waxa u baahan in dib loo heshiisiiyo. Cilmi baaristu waxa ay soo shaac bixisay asalka cabashooyinka ka dhex jira bulshooyinka dhexdooda iyadoo adeegsaneysa nidaamka wada hadalka kooxeed (FGD).

Guud ahaan xiriirka dadka waxa la ogaaday in uu yahay mid wanaagsan, Jubbada Dhexe oo keliya ayay qaar ka mid ah dadkii la wareystay sheegeen in xiriirka bulshada uu yahay mid aan fiicneyn. La wareystayaashu waxay ka hadleen baahida loo qabo dib u heshiisiin hoos laga soo billaabo iyo in laga jawaabo cabashooyinka soo jireenka ah tan iyo waagii Siyaad Barre in ay muhiim tahay.

Sawir 9: Waa sidee xiriirka ka dhexeeya qabaa'illada kala duwan iyo kooxaha xaafadaha aad deggan tahay



Khilaafaadyada ay sheegeen dadweynaha waxaa lagu sheegay in ay yihiin khilaafaadyada dhulka iyo maamulka siyaasadda ee heerka maxalliga ah taasoo soo socotay 10 ilaa 20 sano. Khilaafaadyada qaar ka mid ah sida rabshadaha dhallinyarada, waxa ay soo baxeen shanti sano ee ugu dambeysay. Waxaan u baahannahay in aan sahmino sababta dhallinyarada ay qayb uga yihiin rabshadaha isla markaana la helo farsamo ayaga u suurtageliya in ay ka qayb galaan siyaasadda oo aan rabshado wadan.

Helitaanka adeegyada ayaa sidoo kale loo arkaa in ay ka mid yihiin asalka waxyaabaha keena cabashooyinka. Gobollada Gedo iyo jubbada hoose, dad badan waxay qabaan in adeegga loo qaybiyay si siman ama mid xoogaa loo siman yahay. Inkastoo, jubbada dhexe 62% dadka ay sheegeen in dhulka aan loo sinneyn. Goobaha biyaha laga dhaansado iyo daaqsinka waa qayb kale oo ka mid ah waxyaabaha aan loo sinneyn helitaankooda, tanina waxay astaan cad u tahay xiriirka aan wanaagsanayn ee ka dhexeeya bulshooyinka Gobolka Jubbada Dhexe. Si siman u qaybsiga deeqaha iyo adeegyada kale ee loo baahan yahay waxay la wareystayaasha u arkeen in ay yihiin farsamada ugu sahlan oo lagu hagaajin karo xiriirka bulshada.

Maamulka Jubbaland iyo xallinta khilaafaadka

Walow odayaasha iyo guddiyada xaafadaha iyo maamulayaasha degmooyinka inta badan loo arkay in ay yihiin kuwa gaara go'aannada heerka maxalliga ah, marka ay timaaddo xallinta khilaafaadka, 43% dadka waxay qabaan in maamulka Jubbaland uu xalliyay arrimaha jira. Tan labaad, 29% waxaa lagu xalliyay qaabka xallinta khilaafaadka maxalliga (Local Dispute Resolution Mechanism). Maamulka Jubbaland ee KMG ah waxa loo aqoonsaday in uu yahay jilaha xalliya arrimaha dhaqaalaha, halka dowladda federaalka ah loo arko in ay xalliyaan khilaafaadka heerka qaran ee la xiriira daneeyayaasha dibadda. Ugu dambeyntii bulshadu waxay u baahan tahay qaab-dhismeed maamul oo xalliya khilaafaadka isla markaana maareeya kheyraadka.

Xuduudda Xeerka iyo baahida dib u heshiisiinta bulshada

Dad fara badan ayaa ka hadlay xuduudda hab dhaqameedka xallinta khilaafaadka. Arrinta ugu muhiimsan waxay ahayd sida ay odayaasha ugu jilcan yihiin dhaqaalaha sababtaas darteedna aysan u gaari jirin go'aan dhexdhexaad ah oo xaq ah.

Caddaaladda xallinta khilaafaadka: Inkastoo odayaashu ay doonayaan in ay gaaraan xal xaq ku saleysan, haddana dad badan way diidaan go'aannada odayaasha ama waxayba ku hanjabaan in ay sameynayaan rabshado haddii aysan helin sida ay doonayaan. Oraahda oranaysa: "Ma ahan xaq/caddaalad ee waa xal" waxay muujineysaa sababta aysan xaq u ahayn go'aannada la gaaray. Is hortaagidda in rabshado kale ay dhacaan

ayaa muhimadda kowaad ka ah mabaadi'da garsoorka iyo sinnaanta ee go'aannada qaab dhaqameedka xallinta khilaafaadka. Ugu dambeyntii, qof kasta oo awood u leh in uu ku hanjabo abaabulidda colaad ayaa ku guuleysta khilaafka.

Nidaamka dhaqanka ee xallinta khilaafaadka ayaa waxa loo arkay in uu yahay midka keena caddaalad-darrada. Marka la eego dadka laga tirada badan yahay, waxa loo arkay in uu nidaamku yahay is xukun xoog ku dhisan oo loo marayo xukunka waayeellada. Run ahaantii odayaasha dadka laga tirada badan yahay ayaa marar badan isku dayay in ay wada xaajood ka galaan natiijada xun ee ugu yar. Qayb ka mid ah sababaha arrintaas loo rumeysan yahay waa - ma ahan caddaalad balse waa xal, tani waxa sabab u ah awood la'aanta fulinta go'aannada xaqa ku dhisan, waxayna sidoo kale muujineysaa heerka sare ee ay gaareen rabshadaha caadada ka noqday guud ahaan soomaaliya.

Ugu dambeyntii, dejinta ama oogidda go'aanno xaq iyo sinnaan ku dhisan iyo fulintooda ayaa wax weyn ka qaban kara cabashooyinka bulshooyinka dhexdooda ah.

Askari ka tirsan ciidammada AMISOM oo amniga Kismaayo u taagan.
© STUART PRICE/UN PHOTO

Fulinta go'aannada odey dhaqameedyada

Maaddaama uu qof kastaa haysto qori, Odayaasha go'aannada ay gaaraan way adag tahay in ay hirgeliyaan. Tani waxay hoos u dhigeysaa doorka odayaasha ee xallinta khilaafaadka. Dad fara badan oo la wareystay ayaa qaba in ilaa la helo qaab shaqeynaya oo lagu hirgelin karo/fulin karo go'aanno garsoor xaq ku qotoma, in ay aad u adkaan doonto in la helo caddaalad iyo in la hagaajiyo xiriirka bulshada.

Ugu dambeyntii taasi waxay ka dhigan tahay in aad loogu baahan yahay in la helo hay'ado dhexdhexaaad ah oo ammaanka ku lug leh oo lala xisaabtami karo isla markaana dabagal lagu sameyn karo iyo garsoorayaal aad u tababaran, ha ahaadeen kuwa nidaam dhaqameedka ama kuwa qaanuunka. Sidaas darteed, xiriirka wanaagsan ee bulshada Doolow waxa sabab u ah ayaan oran karnaa ciidammada awoodda leh iyo maamulka degmadaasi inkastoo taasi dhib ama khasaaro ku keeni karto dad kale.

Dad fara badan oo ka mid ah la wareystayaasha ayaa ka hadlay dhacdo ku saaabsan 12 askari oo ka mid ah qabiilka Madaxweynaha oo ku dilay laba qof Jubbaland kuwaasi oo lagu xukumay dil. Arrintaasi waxay noqotay mid aad loo soo dhoweyey maaddaama dadweynuhu aysan filaneyn in xukun lagu ridayo gacan-ku-dhiiglayaashaasi.

Baahida loo qabo farsamada xallinta cabashooyinka soo jireenka ah

Muddo 25 sano ah oo khilaafaad ba'ani hareeyay dalka ayay dhacayeen dembiyo iyo isku xad gudub fool xun. Waxaa jira cabsi ah in Xeer aan lagu xallin Karin dhibaatooyinkaasi dhacay oo dhan. Kuwo badan waxay xuseen in khilaafaadka siyaasadeed uu aad uga adag yahay dagaal u dhexeeya 2 qabiil, sidaasi darteed aan loogu talagelin in Xeer lagu xaliyo. Odayaasha waxay xilligan noqdeen dad ku lug leh siyaasadda taasi oo xadidday awooddoodii ahayd in ay xeerka dabbaqaan eex la'aan.

Is-Naceyb, malo awaal iyo tuhun saameeya xiriirka

Qabiilladu waxay leeyihiin dhaqan is necbaan ama is jeclaan midba midka kale ah oo aan sabab macquul ah ku qotomin – go'aan mala-awaal ku dhisan. Waxa aad u sahlan in koox lagu fogeeyo caajisnimo, jilleec ama tuugonimo ama laga aamino fakar kale oo aad u xun, wuxuuna dhaqankaasi si weyn u dhaawici karaa wada dhaqanka kooxaha. Waxay sidoo kale xoojinaysaa, si ka soo horjeedda dareenka guud ee garashada, la xisaabtanka shakhsiyaadka dembiyada galay.

Bogsiinta bulshada oo loo adeegsado dib u heshiisiinta bulshada

Haddii dib u heshiisiinta bulshada la doonayo in lagu xaliyo dhibaatooyinkii taariikhiga ahaa, waa in la xaliyo dembiyada ay galeen jilayaasha oo dhan. Waa in sidoo kale dib u heshiisiintu ay xallisaa dembiyadii foosha xumaa ee kufsiga, dilka iyo xatooyada hantida isugu jiray. Si kastaba ha ahaatee, marka loo eego xaaladda siyaasadda ee hadda taagan tani way adkaan doontaa waxaana laga yaabaa in ay halis geliso dib u sameynta siyaasad xasilloon maaddaama siyaasiyiinta qaarkood oo mar ahaa dadka galay dembiyadan oo kale ay caqabad ku noqon karaan isla xisaabtankan taariikhiga ah.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa muhiim ah, xilliga ku meel gaarka ah, in la sameeyo cilmi baaris la xiriirta sida looga gudbi karo caqabadda siyaasiyiinta qaarkood lagala kulmi karo isla markaana loo dhisi karo wax isla oggolaansho dhex marta dadka danuhu ka dhexeeyaan.

Haatan waxaa socda isku dayo dadkii hore uga tirsanaan jiray Al shabaab la doonayo in lagula xisaabtamo dembiyadii ay galeen, Tani siyaasad ahaan waa mid habboon laakiinse, waxay carqaladeyneysaa dadaallada la wado sababo la xiriira dembiyadii ay galeen siyaasiyiinta kale Al Shabaab ka hor.

Federaaleynta in ay wax ka qabatay dib u heshiisiinta bulshada ilaa iyo hadda wax weyn oo cad lagama hayo, inkastoo abuuridda ciidammada boliiska iyo qaab dhismeedka garsoorka iyo dabaqaadda go'aanno garsoor xaq ah dartood lagu doodi karo in federaaleynta ay wax ka qabaneyso howlo bilow ah oo ku saabsan dib u heshiisiinta bulshada.

Gunaanad

- Inkastoo caqabado badani ay jireen, haddana guulo la taaban karo ayaa lagu gaaray dhismaha maamullada xubnaha ka ah federaalka.
- Adeegyada waa la hagaajiyay – gaar ahaan nabadgelyada, xitaa caafimaadka iyo helitaanka waxbarashada kuwaasoo ay si toos ah uga shaqeeyaan Maamulka Jubbaland ama Ururrada aan dowliga ahayn kaddib markii la hagaajiyay nabadgelyada.
- Wada xaajoodka siyaasadda ee rug-caddaaga ayaa Iyana kordhay si loo curiyo siyaasad loo wada dhan yahay.
- Ka guuridda nidaamka 4.5 looga guuray nidaam ku saleysan metelaadda siyaasadda ee deegaanka waxa ay hagaajisay xiriirka siyaasiyiinta iyo dadweynaha.
- Dib u heshiisiinta bulshada oo lagu xaliyo colaaddii muddada soo jirtay waxay u baahan tahay taxaddar badan si kastaba ha ahaatee hagaajinta caddaaladda, xaqnimada iyo u sinnaanta nidaamka xallinta khilaafaadka dhaqanka iyo howlaha boliisku u xilsaaran yahay waxay door weyn ka ciyaari karaan is aaminaadda iyo xiriir wanaagsan oo dhex mara bulshooyinka kala duwan.
- Dadku waxay rabaan doorasho shacbi oo hal-qof-hal cod ah.
- Dadku si fiican uma fahamsana nidaamka maamulka iyo awood qaybsiga aan ku saleysneyn qabiilka.
- Si kastoy ahaataba, ka guuridda nidaamka maamulka ku saleysan xulashada qabiilka oo looga guuro magacaabidda maamul aan ku saleysneyn qabiil wuxuu u baahan yahay maalgelin fara badan oo laga helo bulshada caalamka.
- In la suurtogeliyo ka guuridda maamul lagu soo xusho qabiil waxay u baahan tahay ka go'naan ka timaadda rug-caddaaga siyaasadda.

Talooyinka loo baahan yahay Si horey loogu socdo

Xooji siyaasadda iyo shacbiga si loo taageero geeddi-socodka federaaleynta

- Maaddaama ay dadweynuhu rabaan federaalka, Dowladda federaalka waa in ay taageertaa dhismaha maamullada xubnaha ka ah federaalka.
- Federaaleynta waxa loo arkay in mustaqbalka fog lagu gaari karo midnimo qaran.
- Inkastoo dadweynuhu weli shaki ka qabaan waxa loola jeedo federaaleynta, waxa loo baahan yahay in lagala tashado lagalana yeesho wada xaajood dhismaha xukuumadda.
- Dowladda waxaa looga baahan yahay in ay sameeyaan siyaasado la xiriirta nidaamka federaaleynta maaddaama dastuurka hadda jiraa lagu jahawareersan yahay.

Talooyin:

- Dowladda federaalka ah waa in ay ku taageertaa federaaleynta dejinta siyaasad federaaleyn isla markaana ay dabaqdaa.
- Wada tashi guud oo dadweyne waa in laga yeesho Geeddi-socodka dib u eegista dastuurka.
- Dowladda federaalka iyo kuwa goboleed waa in ay hagaajiyaan xiriirkooda heer wasiirro iyo qaran intaba.
- Maxkamad dastuuri ah waa in la dhiso si ay u xaliso khilaafaadka.

Isku xirka qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo farsamada magacaabidda

- Waxaa jira mas'uuliyiiin siyaasadeed oo fara badan iyo shaqaale dowladeed.
- Qaabka loo magacaabo siyaasiyiinta way kala duwan yihiin. Tani waxay keeneysaa in nidaamka siyaasadda uu noqdo mid fahamkiisu aad u adag yahay.

Talooyin:

- Maamulka Jubbaland waa in uu dejiyaa qaab-dhismeed maamul isla markaana waaxyaha xukuumadda la caddeeyo cid waliba howsha ay u xil saaran tahay, adeegyada ay bixineyso iyo shaqooyinkooda.
- Faahfaahin shaqo (Job descriptions) waa in la sameeyaa. Qof kastana waa in uu garto waajibaadka saaran yo howlaha uu fulinayo.

Xoojinta xiriirka maamul ee ka dhexeeya Jubbaland iyo dadweynaha

Dadku kuma qabaan kalsooni siyaasiyiintooda. Ma garanayaan in siyaasiyiintu ay matalaan danahooda.

Talooyin:

- Xildhibaannada cusub waa in ay dhisaan xiriirka iyaga iyo dadka ay matalaan. Tani waa in ay ka mid noqoto wada xaajoodka heer degmo oo ku saabsan siyaasadda Jubbaland iyo arrimaha maamulka.
- Bulshada caalamka waa in ay tababar u fidisaa xildhibaannada cusub si ay u fahmaan waxa ay sameynayaan ama waajibaadkooda.

Baahida Qorshaha Horumarinta Jubbaland

Maamulka Jubbaland waa in uu kordhiyaa adeegga bulshada iyo in uu maamulku gaaro Jubbaland oo dhan. Qorshe horumarineed waxa uu kaalin ka ciyaari karaa in uu isu keeno shacabka Jubbaland iyo maamulkooda dejintiisana waa in laga wada qaybgalo.

Qorshaha horumarinta wuxuu dadweynaha u suurtagelin karaa in ay fahmaan waxa uu maamulku damacsan yahay iyo waxa ay ka filanayaan. Waxay kaloo dadka ku caawin kartaa in maamulku uu noqdo mid lala xisaabtami karo haddii aysan sameynin waxa ay qorsheysato.

Talooyin:

- Waa in maamulka Jubbaland uu dejiyo Qorshaha Horumarinta ee Jubbaland iyadoo wada tashiyo lala sameynayo dadweynaha iyo dadyowga kale ee ku lugta leh horumarka Jubbaland.
- Bulshada caalamka waa in ay u fidisaa gargaar farsamo iyo dhaqaale si loo taakuleeyo qorhahaas horumarineed.
- Maamulka Jubbaland waa in uu sameeyo dakhli abuuris gudaha ah si loo suurtageliyo hirgelinta qorshahaasi.

Kordhinta howlaha maareynta maaliyadda guud iyo miisaaniyadda dadweynaha

Maareynta miisaaniyadda dadka ka wada dhexeysa waa in ay noqoto mudnaanta kowaad. La'aanta siyaasad wanaagsan oo ku saabsan canshuuraha iyo kharashaadka, waxa suurtagal ah in dadka dhowr jeer la canshuuro ama waxa dhici kara musuqmaasuq iyo in siyaasiyiintu ay ka faa'iideystaan dhaqaalaha dadka ka wada dhexeeya.

Talooyin:

- Nidaamka cusub ee maareynta dhaqaalaha dadka ka dhexeeya (PFM) ayaa laga billaabay Kismayo iyadoo taageero laga helayo bulshada caalamka. Nidaamkaasi waa in la sii wado lana ballaariyo.
- Waa in uu jiro qaab-dhismeed heer qaran ah oo ku saabsan maareynta dhaqaalaha dadka ka dhexeeya (PFM). Dowladda Federaalka waa in ay isku xirto isla markaana hoggaamiso sameynta qaab-dhismeedkaasi iyadoo la tashaneysa maamul goboleedka.

Kordhinta wacyiga dadweynaha ee la xiriira qaababka maamulka aan ku dhisneyn qabiilka

Way sii socon caqabadaha uu qabiileysiga ku hayo dhismaha qaranka. Dadka la wareystay waxay qabiilka u arkaan in uu caqabad ku yahay maamul wanaagsan, inkastoo dad badani aan fahamsaneyn ama ku kalsooneyn weli nidaamka aan ku saleysneyn qabiilka.

Talooyin:

- Maamulka Jubbaland waa in uu ka shaqeeyaa sidii caddaaladda iyo xaqnimada loogu soo dabbaqi lahaa garsoorka iyo go'aannada maamulka iyadoo la xaqiijinayo in go'aannadu aysan saameyn ku yeelan qabiillada.
- Waxbarashada madaniga ah ayaa loo baahan si loo suurtageliyo wacyigelin ku saabsan nidaam maamul oon qabiil ku dhisneyn.

U guuridda Doorasho shacab

Tiro badan oo ka mid ah dadka wareysiga lala yeeshay waxay sheegeen in dadweynuhu ay rabaan in xubnaha fulinta, wasiirrada, xildhibaannada iyo guddiyada degmooyinka lagu soo doorto nidaamka hal-qof-hal-cod.

Talooyin:

- Maamulka Jubbaland waa in ay ka go'naataa in magacaabidda xildhibaannada sannadka 2019 ay noqoto hal-qof-hal-cod.
- Waa in sida ugu dhaqsiyaha badan loo dejiyaa Qorshe shaqo oo ku aaddan doorashooyinka 2019. Qorshahani waa in ay ka mid noqdaan dhammaan qaybaha muhiimka u ah doorashadaasi sida guddiyada ilaalinta doorashooyinka iyo soo saarista shuruucda kale ee muhiimka u ah doorashada.
- Nidaamka diiwaangelinta codbixiyayaasha oo mid ah waa in si deg deg ah la isugu raaco dhammaan dowladda federaalka iyo kuwa goboleedyada si ay aasaas ugu noqdaan doorashooyinka heer qaran iyo kuwa maamul goboleedyada.
- Dowladda federaalka ah waa in ay gacan weyn ka geysataa isbeddel siyaasadeed oo ku wajahan doorasho shacbi oo soomaaliya ka dhacda.
- Bulshada caalamka waa in ay taageero dhinaca farsamada iyo mid maaliyadeed u fidisaa si sannadka 2019 ay uga dhaqangasho doorasho shacbi Kismaayo iyo sidoo kale, barashada qaabka codeynta, diiwaangelinta codbixiyayaasha iyo taageerada farsamada ee looga baahan yahay in doorashooyin ay dhacaan.
- Jilayaasha oo dhan waa in ay iska ilaaliyaan ku hadalka doorashooyin kol haddii doorasho shacab aysan dhici Karin.

U guuridda nidaamka axsaabta siyaasadeed

Axsaabta siyaasiga iyo ururradaba waa wadiiqo ay dadweynaha uga qaybgeli karaan go'aan ka gaarista siyaasadda iyo matalaadda. Waxay yareyn kartaa doorka qabaailka haddii si fiican loo sameeyo. Shuruudaha axsaabta siyaasiga waxay muhiim u tahay in ay saameyn ku yeelato sida ay axsaabta u shaqeyn doonaan. Axsaabta siyaasadda waxay gacan ka geysan karaan abuuridda mucaarad siyaasadeed oon rabshado wadan.

Talooyin:

- Shuruudaha dhismaha axsaabta siyaasiga ah iyo shuruucda la xiriirtaba waa in dowladda federaalka ah ay dhammeystirtaa bulshada caalamkana ay taageeraan.
- Shuruudaha axsaabta siyaasiga ah waa in ay dhiirrigeliyaan wada shaqeynta iyo iskaashi dhexmara qabaaillo kala duwan.
- Bulshada caalamka waa in ay maalgeliyaan dhismaha iyo aqoonta axsaabta siyaasiga ah.

Caddeynta u dhalashada iyo xuquuqaha iyo matalaadda la xiriirta

Maaddaama ay jiraan xaddi aad u ballaaran oo qaxooti ah, waxaa muhiim ah in la ogaado yaa muwaadin soomaaliyeed ah yaase leh xuquuqda siyaasadeed iyo tan codeynta iyo dowlad goboleedka uu ka tirsan yahay muwaadinkaasi. Tani waxay u baahan tahay wada xaajood iyo dejinta shuruuc la xiriirta arrimahaasi.

Talooyin:

- Maamul goboleedyada iyo dowladda federaalka ah waa in ay si wadajir ah ugu heshiiyaan waxyaabaha aasaaska u ah diiwaangelinta codbixiyayaasha iyo in la hirgeliyo diiwaangelinta.

Go'aan ka gaaridda xuduudaha degmooyinka iyo diyaarinta farsamada xalintooda

Xuduudaha u kala dhexeeya degmooyinka iyo maamul goboleedyada waxay u baahan yihiin in la kala caddeeyo si looga gaashaanto khilaafaadka mustaqbalka.

Talooyin:

- Maamulka Jubbaland waa in uu si dhow ula shaqeeyo Guddiga Federaalka ee Xuduudaha si go'aan looga gaaro xuduudaha degmooyinka.
- Bulshada caalamka waa in ay u fidisaa taageero dhinaca farsamada ah si loo dhammeystiro xuduudaha degmooyinka, diiwaangelinta cod-bixiyayaasha iyo shuruudaha muwaadinnimada.
- Si Guddiga Xuduuduhu howshooda u fushadaan, waa in dowladda federaalka ah ay si deg deg ah dib u eegis ugu sameyso doorka iyo shaqada Guddiga Federaalka ee Xuduudaha isla markaana xaqiijiyaan taageerada maaliyadeed ee ay u baahan yihiin si ay howshooda u qabsadaan.

Dhammeystirka wada xaajoodka ka wada qaybgalka siyaasadda iyo dhammeystirka laamaha dowladda

Wada xaajoodka ku saabsan ka wada qaybgalka siyaasadda waa mid aad u fiican, laakiin waxaa loo baahan yahay in la dhammeystiro.

Talooyin:

Maamulka Jubbaland waa in ay sii waddo wada xaajoodyada ay kula jirto dadka siyaasadda daneeya ee Jubbaland. Hase yeeshee, waa in loo dejiyaa jadwal shaqo si looga baaqsado waqtiga sii dheeraanaya.

- Siyaasiyiinta kula jira wada xaajoodka dowladda Jubbaland waa in ay muujiyaan rabitaan siyaasadeed si meel dhexe la isugu yimaado loona dhammeystiro wada xaajoodka.

- Maamulka Jubbaland waa in uu si joogto ah ula socodsiiyaa dadweynaha sababta maamulku uusan ula xiriirin, u dejinin jadwal waqtiyeysan ulana socodsiin wada xaajoodyada socda ee ka dhexeeya wakiillada qaybaha kala duwan iyo Maamulka Jubbaland heerka ay marayaan.

Sii wadidda dib u mideynta maleeshiyaadka jubbaland iyo boliiska iyo militariga qaranka

In la helo hal ciidan qaran iyo mideynta maleeshiyaadka qabaailka iyo qaab dhismeedka amniga qaranka waxay muhiim u tahay dhismaha ciidan qaran oo mideysan iyo hoos dhigidda hanjabaadaha maleeshiyada qabaailka ee hardamaya.

Talooyin:

- Maamulka Jubbaland waa in uu sii wado la shaqeynta dowladda federaalka iyo hay'adaha caalamka si maleeshiyada loogu daro ciidamka qaranka soomaaliyeed.
- Maamulka Jubbaland waa in uu ka fududeeyaa sidii maleeshiyada qabaa'ilka loogu soo dari lahaa xoogagga amniga ee Jubbaland si loo xaqiijiyo in ciidammada amnigu ay ku jiraan dhammaan qaybaha qabaa'ilka Jubbaland.
- Bulshada caalamka waa in ay sii waddaa dadaalkeeda ku aaddan ku daridda maleeshiyaadka ciidanka amniga Jubbaland, ciidanka militariga iyo kan boliiska qaranka soomaaliyeed.
- Waa in la abuuro kooxo korka ka ilaaliya oo madaxbannaan si ay dabagal ugu sameeyaan boliiska Jubbaland iyo kuwa amniga, isla markaana la caddeeyo, jawaab laga bixiyo isla markaana lo joojiyo adeegsiga ciidanka booliska iyo kuwa amniga istimaalidda xoog ku muquunis iyo awoodda.

Waa in daraasad laga sameeyo marxaladda kala guurka caddaaladda si loo helo dib u heshiisiin bulshadeed

Hababka hadda loo maro dib u heshiisiinta bulshada waa bilow laakiin ma xallinayaan qaar ka mid ah dacwooyinka aadka u adag sida kufsiga, dilka iyo xatooyada hantida ee la soo maray muddadii 25ka sano ahayd ee dagaallada ahliga ah lagu jiray. Dib u heshiisiinta waa in ay xallisaa dembiyadii horey uga dhacay dadka oo dhan ma ahan oo keliya kuwa ay galeen Al-Shabaab.

Talooyin:

- Cilmi baaris waa laga sameeyaa into transitional justice approaches loo istickaali karo Soomaaliya. Arrintaasina waa in ay si wadajir ah u sameeyaan xubnaha qaybta ka ah khilaafaadka. Maamul goboleedyada iyo tan federaalkuba waa in ay caddeeyaan halista, faa'iidooyinnka, fursadaha iyo taageerada loo baahan yahay si loo sameeyo nidaamka kala guurka garsoorka

Sameynta Caddaalad, sinnaan, xaqsoor iyo masuuliyad shakhsiyadeed udub dhexaad u ah mabaadi'da habka xallinta khilaafaaka

Sinnaanta, xaqsoorka iyo garsoorka waa in ay ka noqdaan qayb muhiim ah xallinta khilaafaadka. Tani waxay suurtagelin kartaa in la dhiso is aaminaadda dadka iyo billaabidda dib u dhisidda bulshada. Garsoorka dhaqanka iyo tan caadiga ah waa in ay si wadajir ah ugag shaqeeyaan fulinta boliiska.

Talooyin:

- Maamulka Jubbaland waa in uu ka shaqeeyaa sidii la isu waafajin lahaa nidaamka xallinta khilaafaadka dhaqanka iyo qaab dhismeedka howlaha boliiska si ay u suurtagasho fulinta go'aannada odayaasha.
- Si odey dhaqameedyadu awood ugu yeeshaan in ay gaaraan go'aan xaq ah, caddaalad iyo garsoor ku saleysan waa in la xoojiyo aqoontooda.

- Waa in la diiwaangeliyo go'aannada ka soo baxa hab-dhaqameeedka xallinta khilaafaadka si ciidanka boolisku u garto qaabka loo fulin karo go'aannadaasi isla markaana odey dhaqameedka kale aysan wax uga beddelin.
- Waa in la xoojiyo iyadoo la adeegsanayo tababarro garsoorayaasha iyo qareennada aqoontooda ku saabsasn shuruucda dalka adeegsiga kooxaha paralegalka. Waxbarashada madaniga ah waa in qabto si loo fahmo waajibaadka iyo mekanisamka sida loo adeegsado niyaamyadaasi.

Xaqiijinta dhowridda xuquuqda madaniga iyo tan siyaasadeed

Xuquuqda siyaasadda iyo tan madaniga sida xorriyadda hadalka, saxaafad xor ah iyo xuquuqda ururrada siyaasadda waa mabdaadi'da aasaaska u ah demoqraadiyadda. Ururro bulsho wax ku ool ah waxay u suurtagelin karaan in dowladda ay u sameeyaan dood wax hagaajin ah iyo talooyin wax ku ool ah. Tani waxay keeneysaa in aaraa'da dadweynaha ay gaarto go'aan gaarayaasha si ay danahooda uga shaqeeyaan.

Talooyin:

- Maamulka Jubbaland waa in uu dejiyaa shuruucda ilaalinaysa xuquuqda siyaasadda iyo tan madaniga
- Maamulka Jubbaland waa in uu u dejiyaan shuruuc ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka Warbaahinta (Media)
- Bulshada caalamka iyo maamulka Jubbaland waa in ay ku taageeraan dhismaha bulshada rayidka isla markaana xaqiijiyaan ka qaybgalkooda wada xaajoodyada siyaasadda ee ku saabsan horumarka iyo adeegga bulshada iyo dhismaha dalka.

Saferworld waa hay'ad caalami ah oo madaxbannaan oo u taagan joojinta khilaafaadka hubeysan iyo dhisidda nolol nabadeed. Waxaan la shaqeynaa dadka caadiga ah ee ay khilaafaadku hareeyeen si aan u hagaajino amnigooda isla markaana aan uga sameyno cilmi baaris iyo laf-gurid. Waxaan u isticmaalnaa caddeymaha ka soo baxa cilmi baarista hagaajinta deegaan, qaran iyo siyaasadaha caalamiba ee gacanta ka geysan kara suurtagelinta nabadgelyo waarta. Muhimaddayadu waa dadka – waxaan rumeysan nahay duni uu qof walbaahi ku noolaan karo nabadgelyo, nolol hagaagsan oo xor ka ah cabsi iyo nabadgelyo la'aan.

Ma nihin hay'ad faa'iido doon ah waxaana mashaariic kala duwan ka wadnaa ku dhowaad 20 waddan iyo maamul goboleedyo (territories) ku baahsan Afrika, bariga dhexe, aasiya iyo Yurub.

SOSCENSA waa dallad aan dowli ahayn, siyaasad ku lug lahayn isla markaana aan fii'iido doon ahayn oo ku kulmisa jilayaasha aan dowliga ahayn ee soomaaliyeed hal Dallada. Ujeeddada daladdu waa in ay u fidiso jilayaasha aan dowliga ahayn ee soomaaliyeed Gole wada xaajood iyo dhisidda wax isla oggolaansho si ay ugu fududeyso in ay ka qaybgalaan go'aan gaarista heer qaran iyo caalamiba, suurtagelinta mustaqbal amni iyo nabadgelyo mustaqbalka dadweynaha soomaaliyeed. Waxyaabaha ugu waaweyn ee ay daladdu u qareento waxa ka mid ah horumarka, maamul wanaagga, dimoqraadiyadda, nabad-dhisidda, xuquuqda aadanaha iyo maamul-dhisidda iyo amniga.

SAWIRKA JALDIGA: Dhallinyaro ku ciyaaraysa kubadda cagta xeebta Kismaayo, Soomaaliya. Waxa dib caadi ugu soo noqonaya nolosha jiilka soo koraya. © CULTURAL VIDEO PRODUCTION/SAFERWORLD

SAFERWORLD

UK OFFICE
The Grayston Centre
28 Charles Square
London N1 6HT, UK
Phone: +44 (0)20 7324 4646
Fax: +44 (0)20 7324 4647
Email: general@saferworld.org.uk
Web: www.saferworld.org.uk

KENYA OFFICE
PO Box 21484-00505
1st floor Titan Plaza
Chaka Road, Nairobi
Kenya
Phone: +254 (0)20 2713603 / 2733250 / 2736480 / 84
Fax: +254 (0)20 273 6283

SOSCENSA
Mogadishu
KM5, Wadajir district
Bula Hubei
Near Hormuud office
Phone: +252 615500952
Web: www.soscensa.org

Registered charity no. 1043843
A company limited by guarantee no. 3015948

ISBN 978–1–909390–43–0